100% Bilaash, 100% Xalaal, 100% Soomaali.

*Tarjumaaddii: Maxamuud Maxamed Cabdi (1985) iyo kuwo kale.*
*Farsamadii, dib-u-qoristii iyo habeyntii: Eng S Jama.*

*Fadlan, ogow tafsiirkani waa tarjumaad guud, si ardeyda iwm, ay u fahmaan macnaha Quraanka Kariimka ah.*
Wixii faah-faahin dheeraad ah, sharraxaad badan ama faallo gaar ah u sii baahan, fadlan, la kaasho khubarada/culimada tafsiirka Quraanka ku takhasustay.

--- *** ---

077: **Suurat Al-Mursalaat**
Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.
1. Waxaan ku dhaartay dabaysha wanaagga lala diro.
2. Iyo dabaysha sida daran u dhabata.
3. Iyo dabaysha roobka kicisa.
4. Iyo malaa'iigta xaqa iyo baaddilka kala bixisa.
5. Iyo malaa'iigta waxyiga soo dejisa.
6. Si dadka loo waaniyo, looguna digo.
7. Ee waxa dadoow Eebbe ku yaboohay, wuu dhici.
8. Markase xiddigaha nuurku ka tago.
9. Oo samadu dildillaacdo.
10. Oo buuraha la rujiyo.
11. Oo rasuulladii la kulmiyo (iyo dadkoodii).
12. Maalin weyn oo loo qabtay darteed.
13. In dadka la kala bixiyo dartiis.
14. Maalinta kala-bixinta ma taqaannaa.
15. Halaag wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa beeniyey.

Eebbe wuxuu rabo ayuu ku dhaartaa oo ka mid ah Khalqigiisa. Halkanna wuxuu ku dhaartay shan arrimood, in waxa lagu dhaaran ay shaki la'aan tahay inuu dhici. Kaas oo ah abaal-marinta Qiyaame. Waxaana ka horrayn waxyaalo waaweyn sida xiddigaha oo madoobaada, cirka oo duleeshama (dildillaaci) iyo buuraha oo burbura. Maalintaasna waxaa la kulmin rasuulladii iyo ummadohoodii. Mujaahidna wuxuu yidhi: "Waa maalinta la soo kulmin rasuullada si ay ugu marag kacaan ummadohoodii".
*Al-Mursalaat (1-15).*

16. Miyaannaan halaagin ummadihii hore.
17. Haddana aannaan raacineynin kuwii dambe.
18. Sidaas ayaan ku falaynaa dembiileyaasha.
19. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa beeniya.
20. Miyaannaan idinka abuurin biyo tamar yar.
21. Markaasna yeelnay meel ilaashan.
22. Tan iyo muddo la yaqaanno.
23. Annagaa wax qaddarray, wax qaddarana u fiican.
24. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa beeniya.
25. Miyaanaan ka yeelin dhulka kafaalo-qaade.
26. Nolol iyo geeriba.
27. Waxaannu yeelnay dhulka dhexdiisa buuro sugan oo waaweyn. Waxaanna idinka waraabinnay biyo macaan.

28. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa beeniyay.

Eebbe wuxuu innooga digay wixii ku dhacay ummadihii hore. Isagoo inna xusuusin waxa la innaga abuuray iyo siduu inoo abuuray. Iyo siduu dhulka innoogu sahlay, looguna dul noolaan, looguna dhiman. Oo buurahana ugu sugay, biyo macaanna innooga waraabiyey.
Culimada Quraanka fasirtayna waxay yidhaahdeen: "Eebbe wuxuu ku celceliyey suuraddan, 'Halaag wuxuu u sugnaaday kuwa xaqa beeniyey', toban jeer si loo badiyo doonidda iyo cabsida".
*Al-Mursalaat (16-28).*

29. Aada (u socda) gaalooy cadaabkii xaggiisa aad beenin jirteen.
30. Aada hoos (qiiqa naarta) oo saddex madax ah.
31. Oo aan hoosinayn, ololna (kulaylna) wax ka tarayn.
32. Waxayna naartu tuuri dhimbiilo daran oo aad mooddo daar.
33. Ama aad mooddo geel madow ah.
34. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa beeniyay.
35. Taasina waa maalin aanu hadlaynin dadku.
36. Lamana idmo si ay u cudur-daartaan.
37. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa beeniyay.
38. Maalintani waa maalintii kala-bixinta. Waana idin kulminnay, idinka iyo kuwii horreeyayba.
39. Ee haddaad wax dhagri kartaan, dhagra.
40. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalimtaas kuwa xaqa beeniyay.

Eebbe cidna ma dulmiyo. Qiyaamahana waxaa lagu abaalmarin xaq-diideyaasha caddibaad daran. Iyadoon cidna hadli karin, ruux Eebbe idmo mooyaane, iyadoo dadkoo dhan la kulmin.
Dhabarina wuxuu yidhi: "Hooska naartu kuleylkeedana/ololkeedana kama hadheeyo, qabowgeedana kama dugsiyo".
*Al-Mursalaat (29-40).*

41. Kuwa Eebbe ka dhawrsada waxay ku sugnaan hoos iyo ilo.
42. (Waxayna cuni) khudaarta ay doonaan.
43. Waxaana lagu odhan, "Cuna oo cabba idinkoo shifaysan, camalkiinnii dartiis".
44. Sidaas ayaannu ku abaal-marinaynaa kuwa wanaagga fala.
45. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalimtaas kuwa xaqa beeniyay.
46. (Gaalada waxaa lagu odhan), "Cuna oo raaxaysta wax yar. Waxaad tihiin dembiileyaale".
47. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalimtaas kuwa xaqa beeniyay.
48. Markii la yidhaahdo gaalada, "Tukada". Ma tukadaan.
49. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa beeniya.
50. Hadalkee ayey Quraanka dabadiis rumeynayaan.

Ruux waliba wuxuu la kulmi wuxuu hormarsaday, wuxuuna goosan midhuhuu abuurtay.
Muu'miniintuna waxay ku sugnaan Maalintaas Qiyaame hoos iyo biyo dureeri (qulquli), iyo nicmo badan.
Halka ay gaaladuba ku sugan tahay naar daran, oon iyo kadeedba, maxaa yeelay wanaagoodii adduunyadii bay ku soo hormarsadeen.
Waxaase la yaab leh oo is weydiis mudan ruuxii Quraankan rumeyn waayaa waxa kale ee uu rumeyn.
Muqaatil wuxuu sheegay: "Inay ku soo degtay aayadda, 'Haddii loo yidhaahdo tukada ma tukadaan', reer Thaqiif oo nebiga ka codsaday in salaadda laga daayo.
Nebiguna (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) uu diiday oo uu yidhi: 'Khayr ma leh diin aan salaad lahayni'." Taasina waxay ku tuseysaa salaadda iyo Islaamnimadu inay isku xidhan yihiin.
*Al-Mursalaat (41-50).*

076: **Suurat Al-Insaan**

Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.
1. Dhab ahaan waxaa dadka soo maray waqti wax la sheego aanu ahayn (aanu jirin).
2. Annagaa ka abuurray dadka dhibic isku dheehan. Imtixaan dartiis, waxaannu ka yeelnay wax maqle, wax arka ah.
3. Annagaa dadka tusnay jidka. Waxayna noqdeen mid shukriya (mahadiya) iyo mid gaalnimo badan.
4. Annagaa u darabnay gaalada silsilado iyo katiinado iyo naarta Saciira.
5. Kuwa baarriyiinta ah (wanaagsan) waxay ka cabbi weel buuxa oo lagu dheehay kaafuur.
6. Waa il ay ka cabbaan addoomada Eebbe, ayna u jiidaan siday doonaan.
7. Wayna oofiyaan nadarka (ballan), waxayna ka yaabi maalin sharkeedu fidi (Qiyaamaha).
8. Waxayna quudiyaan iyagoo jecel miskiinka, agoonka iyo kan xabbisan (dhibban).
9. Iyagoo odhan, "Waxaan idiin quudinnay dar Eebbe, mana idinka doonaynno abaalmarin iyo mahadnaq midna".

Eebbaa jiray iyadoon wax kale joogin. Isagaana hadhi markii la tago.
Waxaana dadka soo maray waqti aanay waxba ahayn. Eebbaase abuuray si loo imtixaano kooda fiican iyo kan kale, jidka iyo wanaaggana wuu u caddeeyay.
Gaaladana caddibaad baa u sugnaatay.
Muu'miniinta Eebbe addeecda ee ballankiisa oofisa, Qiyaamahana ka yaabta ee masaakiinta, agoonta iyo dadka dhibbanna quudiya dar Eebbe dartiis, (Eebbe) wuxuu u darbay janno iyo wanaag.
Qataada wuxuu yidhi: "Sharku wuu fidi Maalintaas, Wallaahiye intuu cirka iyo dhulka ka gaadho".
*Al-Insaan (1-9).*

10. "Waxaan ka yaabaynaa Ilaahayaga Maalin (wejigu) doorsoomi oo daran".
11. Eebbana waa ka dhawray sharka Maalintaas, wuxuuna siiyay nuur iyo farax.
12. Wuxuuna ku abaal mariyay, samirkooda dartiis, janno iyo xariir.
13. Waxayna ku dangiigsan sariiro sare, iyagoon ku arkayn qorrax iyo dhaxan midna.
14. Waxaana u dhow hooska jannada, waxaana loo soo raariciyay midhoheeda.
15. Waxaa lala kor socon weelal fidla ah iyo koobab quraarado ah.
16. Quraaradahaas oo fidla ah si fiicanna u qiyaasan.
17. Waxaana laga waraabiyaa ehlu jannaha sharaab macaan oo lugu dheehay sinjibiil.
18. Waana il lugu magacaabo Salsabiil (ay ka cabbi).
19. Waxaana u adeegi wiilal waari, haddaad aragtaanna aad u malayn jowhar la saydhay.

Eebbe ciddii ka yaabta wuxuu ku abaal marin sharka oo uu ka dhawro iyo janno uu siiyo, iyaga oo aan wax xun la kulmayn. Waxaana u shaqayn adeegayaal waari oo ah wiilal wanaagsan, iyagoo loo dhammeeyay nicmooyinka Eebbe aayadaha ku tilmaamay. Oo ay waajib tahay ruuxii caqli lehi inuu higsado, una darbado.
Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: "Adduunyada waxa lagu sheegayo iyo jannada waxaa kulmiya magaca".
*Al-Insaan (10-19).*

20. Haddaad aragto halkaas waxaad arki nicmo iyo sharaf weyn.
21. Dharkooduna (ehlu jannaha) waa xariir jilicsan oo cagaaran iyo xariir adagba. Waxaana loo xidhi fidlo gacmaha la gashado. Eebbana wuxuu ka waraabiyaa sharaab nadiif ah.
22. "Kaasi waa abaal-marintiinnii, falkiiniina wuxuu noqday mid la mahadiyay".
23. Annagaa Quraanka nebiyow kugu soo dejinnay.
24. Ee ku samir xukunka Eebbe. Hana maqlin dembiile iyo gaalnimo badane (warkiis).
25. Xus magaca Eebbe subax iyo galabba.
26. Habeenkana Eebbe u sujuud, una tasbiixso habeenkii (u tuko) waqti dheer.

27. Kuwaasi waxay jecel yihiin tan soo degdegaysa (Adduunyada). Waxayna kaga tegayaan gadaashooda Maalin culus (Qiyaamaha).
28. Annagaa abuurray dadka, adkaynayna xubnohooda. Haddaan doonnana waxaan ku beddelaynaa kuwo la mid ah.
29. Suuraddani waa waano. Ee ruuxii doonaa ha ka yeesho Eebbe xaggiisa waddo.
30. Waxna ma dooni kartaan in Eebbe doono mooyee. Eebbana waa wax walba oge, falsan.
31. Wuxuu geliyaa naxariistiisa ruuxuu doono. Daallimiintana wuxuu u darbay cadaab daran.

Jannada waxaa ku sugan waxaan ili arag isaga oo kale, dhegina maqal, qalbigana ku soo dhici karin.
Waase in Eebbaha Quraanka soo dejiyay la addeeco, dhibkana loo adkaysto.
Xumaanle warkiisana aan la maqal, Adduunyana aan Aakhiro laga doorannin si aan naxariista Eebbe u helno.
*Al-Insaan (20-31).*

075: **Suurat Al-Qiyaamah**
Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.
1. Waxaan ku dhaaran maalinta Qiyaame.
2. Waxaan ku dhaaran (oo kale) nafta dagaasha (canaanan saaxiibkeed) (ee waa la idin soo bixin).
3. Ma wuxuu u maleeyay dadku in aanaan kulmineynin lafihiisa.
4. Sidaas ma aha ee waan karnaa inaan sinno (soona celinno) farihiisa.
5. Wuxuuse dooni dadku inay ka gaaloobaan waxa ka horreeya.
6. Wuxuu weydiin, "Waa goorma maalinta Qiyaame".
7. Markase araggu wareero (taagmo).
8. Dayaxuna madoobaado.
9. Lana kulmiyo qorraxda iyo dayaxa.
10. Wuxuu odhan dadku Maalintaas, "Xaggee loo cararaa?"
11. Sidaas ma aha ee ma jiro wax la magan-galo (Eebbe mooyee).
12. Xagga Eebbahaa ayaana Maalintaas loo ahaan.

Suuraddan waxaa lagu magacaabaa suuratul-Qiyaame, waxayna ka warrami Qiyaamaha iyo sida Eebbe dadka u soo kulmin. Iyo madax adayga gaalada iyo siday u beenin abaalmarinta.
Maxayse u tari waxaa iman maalin araggu taagmi, dayuxuna madoobaan oo uu qorraxdana la kulmi.
Dadkuna ay odhan iyagoo calaacali, "Xaggee loo cararaa?" maanta. Dhabtuse waxaan Eebbe ahayn oo la magan-galo ma jiro maalintaas, xaggiisaana loo ahaan.
*Al-Qiyaamah (1-12).*

13. Waxaa looga warrami dadka Maalintaas wuxuu hor-marsaday iyo wuxuu dib-marsaday.
14. Ruux walibana naftiisa isagaa ku marag furi.
15. Si kasta hadduu u cudurdaartana (wax uma tarto).
16. Ha dhaqaajinin nebiyow carrabka inaad Quraanka ku deg-degto (akhriskiisa).
17. Annagaa laabtaada ku kulmin, kuuna akhriyi.
18. Ee markaan akhrino, raac akhriskiisa.
19. Annagaana isa saarray caddeyntiisa.
20. Sidaas ma aha ee waxaad jeceshihiin dadow tan soo degdegeysa (Adduunyada).
21. Waxaadna ka tegeysaan Aakhiro.
22. Wejiyaal Maalintaas way ifi.
23. Eebbohoodna way eegi.
24. Wejiyaalna Maalintaas way kaduudsami (murugo awgeed).
25. Waxayna hubaan in lagu fali belaayo (caddibaadi ku dhici).

Eebbe wax ka qarsooni majiro, cid walbana wuxuu uga warrami waxay fashay. Ruux walibana isagaa naftiisa ku marag furi. Wax cudur-daar ahna lagama aqbalo.
Eebbana wuxuu faray nebigiisa in aanu ku degdegin akhriska Quraanka marka waxyigu ku degayo. Maxaa yeelay Eebbaa ballan qaaday inuu Quraanka kulmiyo, nebigana u akhriyo una caddeeyo. Waxaase dhab ah in dadku ka jeclaaday Aakhiradiisa adduunyo (inta Eebbe doono mooyee).
Maalinta Qiyaamana waxaa loo qaybsami cid faraxsan oo Eebbe arki, iyo cid naxsan oo belaayo sugi. Xasan Al-Bisri wuxuu yidhi: "Ilaahay bay fiirin, wayna mutaan inay ifaan iyagoo Eebbe fiirin".
*Al-Qiyaamah (13-25).*

26. Sidaas ma aha ee markay naftu gaadho dhuunta (waqtiga geerida).
27. Oo la yidhaahdo, "Yaa ku tufi" (u duceyn).
28. Oo uu yaqiinsado inuu dhiman.
29. Oo labada dhudhun isku marmaan (sakaraad dartiis).
30. Eebbahaa xaggiisaa la aadi (loo geeriyoon).
31. Mase rumaynin gaalku Xaqa, mana tukanin.
32. Laakiin wuu beeniyay, wuuna jeedsaday.
33. Wuxuuna aaday ehelkiisii, isagoo kibirsan.
34. Halaag buuse mutaa.
35. Haddana halaag buu mutaa.
36. Ma wuxuu u maleeyay dadku in looga tegi bilaash (dan la'aan).
37. Miyaanu ahayn dhibic mani (shahwo) ah oo la dhibciyo.
38. Kaddibna noqota xinjir oo Eebbe abuuro, ekeeyana.
39. Kana yeelo labadii nooc, lab iyo dheddig.
40. Eebbaha sidaas karaa, miyaanu awoodin inuu soo nooleeyo wixii dhintay.

Geeridu waa xaq, waase arrin daran. Wuxuuna Eebbe innooga warramay sakaraadka iyo dhibaatadiisa. Iyo inaan qaraabo iyo cidna wax u tari karayn. Eebbe xaggiisana loo ahaan. Taas oo ay waajib tahay in loo darbado.
Mase habboona in la maro waddadii Abii-jahal iyo wixii la mid ahaa, ee aan xaqa rumaynin, cibaadana falin, balse beeniyay, kana jeedsaday. Kibir iyo isla-weynina ehelkiisa ugu dhex noolaa, halaag buuse mutaa.
Miyaanuse dadku ogeyn in waajib laga rabo, iyo xaqa oo la raaco. Iyagoo xusuusan waxa Eebbe ka abuuray iyo siduu u ekeeyay, rag iyo haweenna ka dhigay. Taas oo ku tuseysa awoodda Eebbe iyo inuu soo kulmin wixii dhintay, si uu u abaal mariyo dhammaantood.
*Al-Qiyaamah (26-40).*

074: **Suurat Al-Muddaththir**
Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.
1. (Nebiga) isdedayow.
2. Istaag oo dig (dadka u dig).
3. Eebbahaana weynee.
4. Dharkaagana daahiri.
5. Xumaantana ka hijrood (iyo sanamyada).
6. Hana ku mannaysan adoo badsan (waxaad bixisay).
7. Eebbahaa dartiisna u samir.
8. Marka Suurka (Qiyaame) la afuufo.
9. Maalintaasu waa maalin ku daran.
10. Gaalada oo aan u fududayn.
11. Isu kaaya daa Aniga iyo kaan abuuray isaga oo keligiis ah.
12. Una yeelnay xoolo badan.
13. Iyo wiilaal jooga oo (darban).
14. Aan una waasiciyay risqiga (arsaaqadda).

15. Oo haddana sii damci inaan u badiyo.
16. Sidaas maaha, ee kaasi wuxuu diiday Aayaadkayaga.
17. Waxaannu ku kallifi (ku dhibi) cadaab daran.

Waxaa sugnaatay in rasuulku (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Eebbe ha yeelee) markuu waxyigu ku bilowday uu is deday, isagoo naxsan.
Markaas Eebbe faray inuu kaco, dadkana u digo. Eebbana weyneeyo, nadaafaddana ku dadaalo.
Xumaantana ka fogaado, wuxuu bixiyana aanu sheeg-sheegin oo dar Eebbana u samro.
Muu'minka dhabta ahna sidaas ayaa laga rabaa.
Markase Qiyaamuhu yimaaddo gaalo waxay la kulmi dhib iyo halaag.
Mana habboona in Eebbihii ku abuuray, ee kuu nicmeeyay, ee aad waliba ka doonayso kordhin aad ka gaaloowdid, xaqiisana ka madax adaygtid sida gaalka aayaduhu tilmaameen.
*AlMuddaththir (1-17).*

18. Gaalkaasu wuu fekeray, wax buuna goostay.
19. Waxaana loo nacdalay siduu wax u goostay.
20. Haddana waxaa loo nacdalay siduu wax u goostay.
21. Kaddib wuxuu eegay (si uu Quraanka u wax yeelleeyo).
22. Wuuna weji macbuusay oo ururiyey (wejiga).
23. Markaasuu jeedsaday oo is kibriyey.
24. Isagoo odhan, "Quraankani ma aha wax aan sixir la soo guuriyey ahayn".
25. "Quraankani ma aha wax aan hadal bashar ahayn".
26. Waxaannu gelin kaas (naarta) Saqara.
27. Ma taqaannaa naarta Saqara.
8. Hilib iyo laf midna ma reebto.
29. Waxayna doorisaa jidhka (oo ay gubtaa).
30. Waxaana kor jooga (ka shaqeeya) sagaal iyo toban malag (ama saf).

Xaqa oo la raaco ayaa habboon. Ruuxiise ka hor yimaadda oo xumaan iyo dhagar maamulaa wuxuu la kulmi dhibaato iyo guul darro, sidii ku dhacday gaalkii Waliid Binu Muqiira ee dulloobay, laguna dilay dagaalkii weynaa ee Badar.
Eebbana wuxuu ugu gooddiyey kaas iyo wixii camalkiisa fala naar daran oo laf iyo lud (hilib) midna aan reebaynin.
Malaa'iigtuna waa junuudda (ciidamada) Eebbe ee naarta ka shaqaysa si loo ciqaabo dembiileyaasha, Eebbe ha naga koriyee.
*Al-Muddaththir (18-30).*

31. Ugama aannaan yeelin naarta kuwa ka shaqeeya malaa'iig, tirana uma aannaan yeelin inay gaaladu ku fidnoobaan mooyaane, iyo inay yaqiinsadaan kuwa Kitaabka la siiyay. Iyo inay kordhistaan kuwii xaqa rumeeyay iimaan, oo aanay shakiyin kuwii Kitaabka la siiyay iyo Muu'miniintu. Iyo inay yidhaahdaan kuwa qalbiga ka buka iyo gaaladu, "Eebbe muxuu uga jeedaa tusaalahan?"
Sidaas ayuu Eebbe u dhumiyaa (lumiyaa) ruuxa uu doono, una hanuuniyaa ruuxuu doono. Wax og junuudda Eebbe oo aan Isaga ahaynina ma jiro. Waxan la soo sheegayna ma aha waano dadka mooyee.
32. Waxaa sugan, dayaxaan ku dhaartaye.
33. Iyo habeenku markuu jeedsado.
34. Iyo subaxu markuu iftiimo.
35. Ee naarta Saqara waa waxyaalaha waaweyn midkood (belaayooyinka).
36. Waana digniinta dadka.
37. Ruuxii doona inuu hormaro, iyo ruuxii doona inuu dib u dhaco, (waa loo digay).

Eebbe wuxuu doono ayuu falaa, naarta cidda ka shaqaynna wuxuu ka dhigay malaa'iig. Si ciddii doontaana ay u hanuunto, ciddii doontaana u dhunto (lunto). Junuudda Eebbeheen iyo ciidammadiisana Isaga ayuun baa og.
Aayadahan la soo sheegeyna waa digniinta dadka.
Eebbana wuxuu ku dhaartay dayaxa, habeenku markuu jeedsado iyo subaxu markuu iftiimo in naarta Saqara ay ka mid tahay belaayooyinka waaweyn. Iyo digniinta dadka; ruuxii doonaa inuu hormaro, kii doonaana inuu dib u dhaco.
Kitaabu-Baxar waxaa lagu sheegay in hor-marka iyo dib-dhaca loola jeedo khayrka oo lagu hormaro iyo isagoo laga dib dhaco.
Ibnu Cabbaasna wuxuu yidhi: "Ruuxii doonaa ha raaco daacadda Eebbe, kii doonaana ha ka dib dhaco".
*Al-Muddaththir (31-37).*

38. Naf waliba waxay u xidhan tahay waxay camal fashay.
39. Hase yeeshee, kuwa midigta mari (ehlu khayrka).
40. Waxay geli jannooyin, waxayna is weydiin.
41. Dembiileyaasha.
42. Iyagoo ku odhan, "Maxaa idin geliyay naarta Saqara?"
43. Waxayna ugu jawaabi, "Ka mid maanaan ahayn kuwa tukada".
44. "Mana aannaan ahayn kuwa quudiya miskiinka".
45. "Waxaannu ahayn kuwa la dhumbada (tiimbada) kuwa xumaanta dhumban".
46. "Waxaannu ahayn kuwa beeniya maalinta abaalmarinta (Qiyaamaha)".
47. "Ilaa ay dhabtu nooga timaaddo" (geeridu).
48. Ma anfacayso kuwaas shafeecada kuwa shafeeca.
49. Maxaase u sugnaaday oo ay waanada uga jeedsadaan (u diideen).
50. Oo aad u mooddaa dameero diday.
51. Oo ka cararay libaax.
52. Haddana wuxuu dooni mid kasta oo ka mid ahi warqado qoran (kitaab).
53. Sidaas ma aha ee kama yaabayaan Aakhiro.
54. Waxaa sugan in Quraanku waano yahay.
55. Ruuxii doona ayaana waantoobi.
56. Mana waantoobayaan in Eebbe doono mooyee. Eebbana wuxuu mutaa in laga dhawrsado, wuxuuna ehel u yahay inuu dembi dhaafo.

Naf walba waxaa laga abaal marin waxay kasbatay, khayr iyo sharba.
Hase yeeshee, ehlu jannuhu waxay weydiin ehlu naarka waxa naarta geliyay.
Waxayna ugu jawaabi, "In aanay tukan jirin, miskiinna quudin jirin, xumaantana tiimban jireen, oo ay Qiyaamahana beenin jireen inta dhabtu uga timaaddo".
Kuwaas shafeeco wax uma tarto, maxaayeelay, xaqa ayey ka jeedsadeen (beeniyeen) iyaga oo aad mooddo dameero bahal ka cararay. Haddana mid kasta oo ka mid ah gaaladu wuxuu dooni in warqad qoran samada looga soo dejiyo.
Dhab ahaantuse waa in aanay Aakhiro ka yaabaynin. Quraankuna waano yahay, ruuxii doonaana waantoobi. Awooddana Eebbaha, in laga cabsado muta ee dembi dhaafna ehel u ah, ayaa iska leh.
*Al-Muddaththir (38-56).*

073: **Suurat Al-Muzzammil**
Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.
1. (Nebiga) isduuduubayow.
2. Istaag habeenkii (tuko), wax yar mooyee.
3. Nuskiisa tuko ama ka nusqaami wax yar.
4. Ama ka badi, Quraanka u akhri si fiican.

5. Annagaa kugu dejin hadal culus (weyn).
6. Habeenka saacadihiisa (oo la tukado) ayaa ku daran khushuucda, aadna u toosan.
7. Maalintii waxaa kuu sugnaatay shaqo dheer.
8. Magaca Eebbana xus, cibaadadiisana u go'.
9. Qorrax ka-soo-bax iyo qorrax u-dhacba Eebbaa iska leh. Isaga mooyee ilaah kalena ma jiro, ee ka yeelo wakiil (la cuskado).
10. Kuna samir waxay sheegi gaaladu, si quruxsanna uga hijrood (iskaga tag).
11. Isu kaaya daa Aniga iyo kuwa beeniyay Xaqa ee nicmaysan, wax yarna sug.
12. Agtayada waxaa ah caddibaad iyo naarta Jaxiimo.
13. Iyo cunto lagu mergado iyo cadaab daran.
14. (Waxay ku dhici arrintaasu) Maalinta dhulka iyo buuruhu gilgilan. Buuruhuna ay noqon tamuux socda (bacaad daadanaya oo aan lugta celinayn).

Nebiga (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu Eebbe faray inuu xaqa gaadhsiiyo dadka, cibaadadana badiyo, gaar ahaan habeenkii. Wuxuuna ku mannaystay inuu ku dejiyay Quraan sharaf leh. Wuxuuna faray inuu badiyo xuska Eebbe iyo cibaadadiisa. Maxaa yeelay Adduunka Eebbaa iska leh, ilaah aan Isaga ahaynna ma jiro.
Waxaa kale oo uu (nebiga) faray inuu Eebbe talo saarto, dhibkana u adkaysto, gaaladana ka hijroodo. Oo uu isu daayo iyaga iyo Eebbe, wax yarna sugo. Maxaa yeelay, Eebbe agtiisa ayaa cadaab iyo ciqaabi u taallaa gaalada maalinta Qiyaame.
Al-Muzzammil (1-14).

15. Annagaa idiin (soo) dirray rasuul markhaati ah, sidaan ugu dirray Fircoonba rasuul.
16. Fircoonna wuu caasiyay rasuulkii (nebi Muuse). Fircoonna waxaan ku qabannay qabasho daran.
17. Ee sidee baad gaalooy uga dhowrsanaysaan caddibaadda maalinta Qiyaame ee carruurta cirroole ka yeeli haddaad gaaloowdaan.
18. Samaduna Maalintaas darteed ay la dildillaaci. Ballanqaadka Eebbana waa wax dhici.
19. Aayadahani waa waano, ee ruuxii doonaa Eebba xaggiisa jid ha uga yeesho.

Diridda rasuulku ma aha wax gaar ku ahayd nebiga (Maxammed), ee waxaa jiray in Eebbe diray nebiyo iyo rasuullo badan sidii nebi Muusihii loo diray Fircoon oo is kibriyay oo beeniyay. Eebbana ciqaab daran ciqaabay.
Ruuxii wax-garad ahise waa inuu waano qaato, una darbado maalinta Qiyaame ee dhibka badan, Eebbe xaggiisana jid fiican uga samaysto.
*Al-Muzzammil (15-19).*

20. Eebbahaa wuxuu og yahay nebiyow inaad tukatid (habeenkii) wax saddex meelood laba, iyo badhkiis, iyo saddex meelood meel. Iyo in koox ka mid ah kuwa kula jira ay tukato. Eebbana waa u qaddaran yahay habeenka iyo maalintuba. Wuxuuna og yahay in aydaan koobi karin, wuuna idinka toobbad aqbalay ee akhriya wixii idiin fududaada oo Quraan ah. Wuxuu Eebbe og yahay inay idinka mid noqon kuwo buka iyo kuwo safri (socdaal ah) iyagoo dooni khayrka Eebbe iyo kuwo u dagaallami jidka Eebbe. Ee akhriya wixii idiin fududaada oo Quraan ah. Salaaddana ooga, sekadana bixiya. Eebbana wax wanaagsan deynsada. Waxaad naftiinna u hormarsataan oo khayr ahna waxaad ka ogaan doontaan, kana heleysaan Eebbe agtiisa isagoo khayr iyo ajri weyn ah. Ee Eebbe dembi-dhaaf weydiista, waa Dembi-dhaafe naxariista e.

Eebbe waa og yahay camalkeenna iyo dhaqdhaqaaqeenna, habeen iyo dharaarba.
Waxaana laga rabaa ruuxa muu'minka ah inuu Eebbe ku xidhnaado oo toobbad keeno. Quraankana akhriyo, camalkiisuna noqdo mid habaysan oo aan ahayn mashaqo iyo dhibaato.
Waxaa lagu shuqloomi karaa jirro (bukaan) iyo tijaaro (ganacsi) xalaal ah. Waase in Eebbe si joogto

ah loo caabudo. Salaadda, sekada iyo khayrkana la hormarsadaa si wanaag, ajri iyo dembi-dhaaf Eebbe agtiisa looga helo.
*Al-Muzzammil (20).*

072: **Suurat Al-Jinn**
Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.
1. Waxaad tidhaahda (nebiyow), "Waxaa la ii waxyooday inay dhegeysteen koox Jinni ahi (Quraanka). Yidhaahdeenna, 'Waxaannu maqallay Quraan layaab leh'.
2. 'Oo ku hanuunin xaqa, waana rumaynay. Waxaan Eebbe cibaado la wadaajineynaana ma jiro'.
3. 'Waxaana sarreeya sharafta Eebbeheen, mana yeelan haweenay iyo ilmo (carruur) midna'.
4. 'Waxay ahaayeen kuwayagii xumaa inay Eebbe ku yidhaahdaan hadallo xadgudub ah'.
5. 'Waxaannu u malaynaynay inaanu insi iyo jinni midna Eebbe ku been sheegaynin'.
6. 'Waxayna ahaayeen kuwo insiga ka mid ahi inay magangalaan kuwo jinniga ka mid ah, markaasna u kordhiyeen kibir (iyo xad gudub)'.
7. Waxayna jinnigu u maleeyeen, sidaad u malayseen, inaan Eebbe soo bixineynin (nooleyneynin si loo xisaabiyo) ruuxna'.

Suuraddani waxay ka sheekayn khalqi ka mid ah makhluuqaadka Eebbe oo ah jinniga; muu'min iyo gaalbana leh.
Waxaana jirtay inay koox (jin) ka mid ahi dhegeysteen akhriska nebiga. Waana in la rumeeyo jiritaankooda; macno ma leh in la yidhaahdo ma aragno. Maxaa yeelay immisaa wax aan la arkayn jira; ka warran naftaada iyo caqligaaga iyo dareenkaaga.
*Al-Jinn (1-7).*

8. 'Waxaan doonnay samada, waxaana helnay iyadoo ka buuxda ilaalin daran iyo danabyo'.
9. 'Waxaannu ahayn kuwo fadhiista xaggeeda meelo, si aan wax uga dhegeysanno. Ruuxiise dhegeysta hadda wuxuu heli danabyo darban (la kulmi)'.
10. 'Mana ogin inay tahay shar lala doonay dadka dhulka ku nool ama Eebbohood la doonay hanuun (iyo khayr)'.
11. 'Waxaa naga mid ah kuwo suubban iyo kuwo kaleba. Waxaannu nahay kooxo kala duwan'.
12. 'Waxaannu og nahay in aanaan Eebbe ku daalin karin dhulka dhexdiisa, kuna daalineynin cararid'.
13. 'Markaan maqallay hanuunkana waan rumaynay. Ruuxii rumeeya Eebbihiisana kama yaabo nusqaan iyo dulmi midna'.
14. 'Waxaa naga mid ah Muslimiin iyo kuwo xadgudbay. Ruuxiise islaamaa waa mid ku dadaalay hanuun'.
15. 'Kuwiise xadgudbay waxay ahaan qoryaha (xaabada) Jahannamo'."
16. Hadday ku toosaan dadku jidka (wanaagsan) waxaaan ka waraabin lahayn biyo badan.
17. Imtixaan dartiis, ruuxii ka jeedsada xusidda Eebbihiis wuxuu geli cadaab daran.

Cirka Eebbaa ilaaliyay, waxyeello iyo xumaanna looma geysan karo. Waxaana jirtay in jinnigu isku deyi jiray inuu dhegeysto, hase ahaatee, markii Quraanka Xaqa ahi soo degay ayaa Eebbe ka ilaaliyay.
Jinnigan aan soo sheegnay kuwo wanaagsan iyo kuwo xun ba way leeyihiin. Kuwooda wanaagsani waxay qirteen inaan Eebbe la daalin karin, xaqayna raaceen. Kooda xunna wuxuu noqon qoryaha (xaabada) Jahannama.
Dadkuna hadday toosnaadaan Eebbe wuu u nicmayn, hadday jeedsadaanna (Xaqa diidaan) wuu caddibi.
*Al-Jinn (8-17).*

18. Masaajidda Eebbaa iska leh ee ha kula baryina (caabudina) Eebbe cid kale.
19. Markuu istaagay addoonkii Eebbe (nebigu) isagoo caabudi Eebbe, waxay jinnigu u dhowaadeen inay korkiisa is dul fuulaan.
20. Waxaad tidhaahdaa nebiyoow, "Waxaan uun caabudi Eebbahay, lana wadaajin maayo cidna".
21. Waxaad tidhaahdaa, "Idiin ma hanto shar iyo khayr midna".
22. Waxaad tidhaahdaa, "Cidina igama korinayso Eebbe, mana helayo isaga ka sokow magangelyo".
23. "Hase yeeshee, waxaan hantaa gaadhsiinta xaqa Eebbe iyo farriimihiisa. Ruuxiise Eebbe caasiya iyo rasuulkiisa waxaa u sugnaaday naarta Jahannama, isagoo ku waari dhexdeeda".
24. Markay gaaladu arkaan waxa loo yaboohi, waxay ogaan cidda gargaarihiisu tamar yaryahay, tirana yaryahay.
25. Waxaad tidhaahdaa, "Ma ogi inuu dhow yahay waxa la idiinku gooddin ama Eebbahay waqti u yeeli".
26. Eebbaa og waxa maqan, umana muujiyo waxaa maqan ruuxna.
27. Marka laga reebo cid uu ka raalli noqday oo rasuul ah, Isagoo hor iyo gadaalba ka ilaalin.
28. Si Eebbe u muujiyo inay gaadhsiiyeen farriimihii Eebbohood. Eebbana waa koobay waxa agtooda ah, wayna u tiro-kooban yihiin wax waliba.

Masaajidyada Eebbaa iska leh, laguna caabudaa. Waase inaan cid kale lagu baryin, laguna caabudin. Eebbana wuxuu faray nebiga inuu u sheego dadka, 'inuu Eebbe keliya caabudi, shar iyo khayrna aanu hanannin'. 'Wax Eebbe ka soo hadhay oo uu (nebigu) magangelin aanu jirin'.
'Hase yeeshee, uu hanto xaqa iyo farriinta Eebbe oo uu dadka gaadhsiiyo'. 'Ruuxiise Eebbe iyo rasuulka caasiya wuxuu geli naar, gargaarana ma helo'. 'Waxa maqanna Eebbe ayuun baa og inuu dhow yahay iyo in kale iyo goortuu iman'.
Hase yeeshee, Eebbe rasuulladiisa uu ka raalli noqday ayuun buu waxyi wax ku ogeysiiyaa, isagoo ilaalin si ay u gaadhsiiyaan farriinta Eebbohood. Eebbana wax walba wuu koobay.
Qataada wuxuu yidhi: "Yuhuud iyo Nasaara waxay ahaayeen kuwii Eebbe wax la wadaajiya. Markaasaa Eebbe faray nebiga in Eebbe keliya la caabudo".
*Al-Jinn (18-28).*

071: **Suurat Nuux**
Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.
1. Annagaa nebi Nuux (nabadgelyo korkiisa ha ahaato e) u dirray qoomkiisii si uu ugu digo caddibaadda horteed.
2. Wuxuuna (nebi Nuux) ku yidhi , "Qoomkayow waxaan idiin ahay dige cad (oo muuqda)".
3. "Ee Eebbe caabbuda, kana dhawrsada, anigana i addeeca".
4. "Wuu idiin dembi dhaafi (Eebbe), wuuna idin dib dhigi ilaa muddo magacaaban. Marka Eebbe la yimaaddo ajasha, wax dib u dhigi ma jiro haddaad wax og tihiin".
5. Nebi Nuux wuxuu yidhi, "Eebboow waan u yeedhay qoomkaygii habeen iyo dharaar".
6. "Yeedhiddayduna uma siyaadinin wax aan carar ahayn".
7. "Mar kasta oo aan u yeedhana, si aad ugu dembi dhaafto, waxay farahooda yeelaan dhegahooda, maryohoodana way isku dedaan, wayna ku madax-adaygaan xumaanta, wayna is weyneeyaan".
8. "Si kor ah ayaan ugu yeedhay (dadka dhexdiisa)".
9. "Waana u qayliyey, hoosna waan ugu yeedhay".
10. "Waxaanna ku idhi, 'Eebbihiin dembi-dhaaf weydiista, waa Dembi-dhaaf badane e'.
11. 'Cirkana roob badan ha idiinka keenee'.
12. 'Hana idiin kordhiyo xoolo iyo wiilal iyo beero, hana idiin yeelo webiyaal'.
13. 'Maxaad leedihiin oo aad weynida Eebbe uga cabsoon weydeen'.
14. 'Isagoo idin abuuray, idinkoo soo maray xaalado kala duwan'."

Eebbe wuxuu nebi Nuux u diray qoomkiisii si uu ugu digo. Hase yeeshee, way beeniyeen, in kasta oo uu si walba ugu yeedhay; habeen iyo dharaar, kor iyo hoos. Waxayna ahaayeen kuwo madax adag sida Quraanku meelo badan ku sheegay. Dhegahana way furaysteen oo dharkoodii ayey isku duuduubeen si aanay xaqa u maqal, inkasta oo uu nebigu ugu yeedhay xaqa.
*Nuux (1-14).*

15. " 'Miyaydaan arkaynin sida Eebbe u abuuray toddoba samo oo isdulsaaran'.
16. 'Dayaxana uga yeelay dhexdooda nuur, qorraxdana ka yeelay siraad (ileys)'.
17. 'Eebbe waa Kan idin ka soo bixiyay dhulka'.
18. 'Haddana idin ku celin doona dhexdiisa, idin kana soo bixin doona'.
19. 'Eebbe waa Kan idiin ka yeelay dhulka gogol'.
20. 'Si aad ugu socotaan dhexdiisa waddooyin waaweyn'."

Waa in dadku Eebbe ka yaabo oo eegaa siduu (Eebbe) u abuuray, cirkana dayax nuuraya iyo qorrax ifaysa ugu yeelay. Dadkana dhulka ka soo bixiyay, kuna celin doono markay dhintaan, kana soo bixin doono waqtiga abaalmarinta. Dhulkana gogol uga dhigay, waddooyinna uga jeexay ay (dadku) danahooda ku qabsadaan.
Eebbaha sidaas ah ayey waajib tahay in keligii la caabudo, laguna mahadiyo.
*Nuux (15-20).*

21. (Nebi) Nuux wuxuu yidhi, "Eebbow way i caasiyeen. Waxayna raaceen kuwo aan xoolohooda iyo carruurtoodu wax aan khasaare ahayn u kordhinaynin".
22. "Dhagar weynna way dhagreen".
23. "Waxay isku yidhaahdeen, 'Ha ka tegina Ilaahyadiinna, hana ka tegina Wuddi iyo Suwaaci yo Yaguuth iyo Yacuuq iyo Nasri'."
24. "Waxayna dhumiyeen (lumiyeen) dad badan, ee Eebbow ha u kordhinnin daallimiinta waxaan baadi ahayn".
25. Gefkoodii dartiis ayaa loo maansheeyay, naarna loo geliyey. Mana helayaan Eebbe ka soke (sokow) gargaare.
26. Nebi Nuux wuxuu yidhi, "Eebbow ha kaga tegin dhulka korkiisa gaalada, ruxna".
27. "Maxaa yeelay, haddaad kaga tagto, waxay dhumin (lumin) addoomahaaga, mana dhalayaan waxaan gaal xun ahayn".
28. "Eebboow u dembi-dhaaf aniga iyo waalidiintay iyo ruuxii gala gurigeyga isagoo muu'min ah, rag iyo haweenba. Hana u kordhinnin daallimiinta waxaan halaag ahayn".

Qoomkii nebi Nuux way beeniyeen xaqii, wayna caasiyeen, waxayna warkooda raaceen madaxdoodii xuma-ku-taliska ahayd. Waxayna is fareen in aanay ka tegin caabudkii ilaahyadooda (sanamyadooda). Dad badanna way dhumiyeen (habaabiyeen).
Dembigoodii dartiis, ayaana (qoomkii nebi Nuux) biyo loogu halaagay, naarna loo geliyay. Gargaare Eebbe ka soo hadhayna ma ay helin.
Markaas nebi Nuux wuu habaaray, Eebbana waa ka aqbalay, maxaa yeelay waxaan xumaan iyo fasaad/fasahaad ahayn ma ayna falayn (sameyneynin).
Muu'miniintana (nebi Nuux) wuu u duceeyay iyo intii raacdayba, rag iyo haween, gaalana halaag ayuu Eebbe u warsaday (weydiiyey).
Nebiguna wuxuu yidhi: "Ha la saaxiibin waxaan muu'min ahayn. Quudkaagana yaanu cunin ruux aan Eebbe ka cabsade ahayni", Imaam Axmad ayaa Abii Saciid ka weriyay.
*Nuux (21-28).*

070: **Suurat Al-Macaarij**
Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.
1. Mid baa wuxuu Eebbe warsaday in caddibaad ku dhacda gaalada (loo soo dedejiyo).

2. Caddibaaddaasna wax gaaalada ka celin ma jiro.
3. Waxayna ka iman caddibaaddaasu Eebbaha sarraynta iyo sharafta u saaxiibka ah.
4. Ee malaa'iigta kale iyo Jibriilba u koraan maalin qaddarkeedu dhan yahay konton kun oo sano.
5. Ee nebiyow samir, samir wanaagsan.
6. Gaaladu waxay caddibaadda u arkaan inay fog tahay.
7. Annaguna waxaannu u aragnaa inay dhow dahay.
8. Caddibaaddaasu waxay dhici maalinta cirku noqon bir la dhalaaliyey oo kale.
9. Buuruhuna ay noqon suuf la tifay oo kale.
10. Sokeeyana aanu sokeeye wax warsanaynin.
11. Wayna is arkayaan, dembiiluhuna wuxuu jeclaan inuu iskaga furto Maalintaas caddibaaddeeda carruurtiisa.
12. Haweenaydiisa, walaalkiis.
13. iyo qaraabadiisii soo dhowaynayey.
14. Iyo waxa dhulka ku sugan dhammaan, markaa uu nabad galo.

Ma habboona in caddibaad iyo halaag Eebbe la weydiisto, maxaa yeelay Eebbe isagaa awoodda leh, cidduu doono ayuuna ciqaabaa. Markay ciqaabtiisu timaaddana wax celin ma jiro.
Qiyaamaha shiddadeeda wax waliba wuu la doorsoomaa, qaraabonnimana ma jirto.
Wuxuuna jeclaan dembiiluhu inuu isku furto qaraabadiisa, xoolihiisa iyo dhulka waxa jooga oo dhan markaana uu nabad galo; lagamase aqbalo.
*Al-Macaarij (1-14).*

15. Sidaas ma aha ee waxaa jirta naar kulul (oo ay geli).
16. Waxayna siibi galka/maqaarka (madaxa iyo jidhka).
17. Waxayna u dhawaaqi dadka jeedsaday, xaqana diiday.
18. Xoolahana kulmiyey oo hayey (aan xaqa ku bixinin).
19. Dadka waa la abuuray iyaga oo naf jeclaysi badan.
20. Haddii dhibaato taabato wuu argagaxaa.
21. Hadduu khayr helana wuu reebaa.
22. Marka laga reebo Muslimiinta tukata.
23. Ee ah kuwa salaaddooda daa'ima.
24. Kuwa xoolahoodana xaq la og yahay ka bixiya.
25. Siiyana kuwa baryootama iyo kuwa aan waxba haysan.
26. Kuwa rumeeya maalinta Qiyaame (ee abaal-marinta).
27. Kuwa ka cabsaday caddibaadda Eebbahood.
28. Maxaa yeelay caddibaadda Eebbe wax ka aammin ahi ma jiro.
29. Kuwa ka ilaaliya xubinta (dhalmada) sino.
30. Waxa ka soo hadhay xaaskooda ama ay hanteen, taasna laguma dagaalo.
31. Ruuxiise doona wax gudubsan, kaasi waa mid xad gudbay.
32. Kuwa waxa lagu aamminay iyo ballankaba ilaaliya.
33. Kuwa maraggooda si fiican u furay.
34. Kuwa salaaddooda xafida (dhawra).
35. Kuwaasi waxay geli jannooyin lagu sharfo.

Eebbe wuxuu u darbay xaq-diideyaasha naar daran oo jidhka gubta, una yeedhi kii xaqa ka jeedsaday intuu adduunka joogay. Waxaa kale oo ay aayaduhu sheegi in dadka dabeecaddiisu ay tahay in marka dhibaato heshana uu argagaxo, markuu nicmo helana uu xaqa diido.
Hase yeeshee, kuwa muu'miniinta ah ee salaadda tukada, xoolahoodana xaqa ka bixiya, Qiyaamahana rumeeya ee caddibaad ka cabsada, farjigoodana xumaanta ka ilaaliya; iyagu way nabad geli. Waxaana

lagu sharfi jannada Eebbe, maxaa yeelay waa kuwo ballan Ilaahay oofiyey.
*Al-Macaarij (15-35).*

36. Maxaa u sugnaaday gaalada oo ay xagga nebiga ugu deg-degi (iyagoo beenin).
37. Iyagoo midigta nebiga iyo bidixdiisaba koox koox u jooga.
38. Ma wuxuu damci ruux kasta oo ka mid ahi in la geliyo jannatu Naciima.
39. Sidaas ma aha ee waxaan ka abuuray waxay og yihiin.
40. Waxaan ku dhaaran qorrax ka-soo-baxyada iyo qorrax-u-dhacyada ee waannu karraa.
41. Inaan ku beddello kuwo ka khayr badan, nagamana dheerayn karaan.
42. Ee iska dhaaf ha dhumbadeen (tiimbadeen) eh (xumaanta). Hana ciyaareen intay kala kulmaan maalintoodii Qiyaame ee loogu gooddiyey.
43. Maalinta ay ka soo bixi qubuuraha (xabaalaha) iyagoo deg degi oo aad mooddo inay u laxaadsan calaamo loo taagay (xaggooda).
44. Araggooduna waa dullaysan yahay Maalintaas, waxaana ka muuqda oo dabooli dulli. Maalintaasuna waa Maalintii loogu yaboohay (abaal marinteeda).

Waxaa jirtay in xaqdiideyaashii reer Maka ay nebiga ku soo ururi jireen, iyagoo koox koox ah oo haddidaad iyo beenin ku dheehan, haddana damci inay wanaag iyo khayr helaan. Waxaase wanaag hela ciddii kasbata.
Eebbena wuu karaa inuu halaago kuwa dembiileyaasha ah, kuna beddelo kuwo ka khayr badan. Hase ciyaarto oo dembi ha fasho ciddii doontaa, waxay uun la kulmi doontaa Maalinta abaal marinta ee dadka la soo bixin, dembiilahana uu dulli ka muuqdo; waa maalinta Qiyaame e.
*Al-Macaarij (36-44).*

069: **Suurat Al-Xaaqqah**
Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.
1. Maalinta Xaaqo (Qiyaamuhu waa wax sugan).
2. Xaaqo maxay tahay.
3. In aanad aqoon ma laga yaabaa Xaaqada.
4. Waxay beeniyeen (reer) Thamuud iyo (reer) Caadba Qiyaamaha.
5. Thamuudse waxaa lagu halligay (halaagay) qaylo daran.
6. Caadna waxaa lagu halaagay dabayl daran oo qabow.
7. Oo lagu diray korkooda toddoba habeen iyo siddeed maalmood oo israacsan. Waxaadna arkaysaa iyagoo daadsan oo aad mooddo jirrid (geed) timir (dogob dhacay).
8. Wax ka hadhay miyaad aragtaa.
9. Fircoon iyo kuwii ka horreeyeyna waa jireen iyo kuwii gefsanaa ee la dabo geddiyey (nebi Luud qoomkiisii).
10. Waxay caasiyeen rusushii (rasuulladii) Eebbahood. Markaasuu (Eebbe) si daran u qabtay.
11. Markay biyihii xad dhaafeen (waqtigii nebi Nuux), waxaan idiin ku xambaarnay (awoowyaalkiin/awooweyaashiinnii) doontii.
12. Si aan uga yeelno waano, ay una xafiddo dheg wax maqasha.

Qiyaamuhu waa xaq sugan. Ciddii xoog isbiddana oo xaqa iyo Qiyaamaha beenisana Eebbaa ka awood badan sida aayadahani i noo caddeeyeen; sida qoomkii nebi Saalax, nebi Huud, nebi Luud, nebi Nuux iyo Fircoon iyo kuwii ka horreeyey.
Waana in lagu waano qaato arrintaas oo xumaanta, xaq diidnimada iyo kibirkana la iska jiro; waa sababaha halaag e.
Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: "Waxaa laygu gargaaray (dabaysha) Saba. Reer Caadna waxaa lagu halaagay (dabaysha) Dabuur".
*Al-Xaaqqah (1-12).*

13. Marka Suurka la afuufo hal mar.
14. Dhulka iyo buurahana la xambaaro oo la burburiyo hal mar.
15. Maalintaas ayaa Qiyaamuhu dhacayaa.
16. Samaduna Maalintaas way dillaaci, wayna tabar yaraan.
17. Malaa'iigtuna cirka gaararkiisa ayey ahaan Maalintaas. Carshiga Eebbana waxaa dadka korkiisa ku xambaari Maalintaas siddeed malag.
18. Maalintaas ayaa dadka loo soo bandhigi Eebbe, wax xaggooda kaga qarsoonna ma jiro.
19. Ruuxiise Kitaabkiisa midigta laga siiyo, wuxuu odhan (farax daraadiis) , "Akhriya kitaabkayga".
20. "Waxaan yaqiinsanaa/aqoonsanaa (Adduunkii) inaan la kulmi xisaabtayda".
21. Wuxuu ruuxaasi ku noolaan nolol laga raalli yahay.
22. Wuxuuna geli janno sarreysa.
23. Midhoheeduna u dhow yihiin (ruuxa guran).
24. Waxaana lagu odhan, "Cuna oo cabba idinkoo shifaysan camalkaad hor marsateen ayaamihii tegay daraadiis (Adduunkii)".

Eebbe isagaa awoodda leh, abuurayna dunida. Wuxuuna dadka u darbay maalinta Qiyaame oo ruux walba laga abaal marin (doono) camalkiisii. Waa maalinta dhulka, buuraha iyo cirkuba doorsoomi (isbeddeli) oo burburi. Wax Eebbe ka qarsoomi ama ka fakanna (baxsan ama badbaadi) aanay jirin. Dadka wanaagsanna waxaa lagu abaal marin wanaag, janno, farax iyo bishaaro-ku-noolaansho. Cumar Binu Khadhaabna wuxuu yidhi: "Xisaabiya naftiinna intaan la xisaabinnin. Miisaamana intaan la miisaamin iyadaa idiinka fudud xisaabta berri e (Aakhiro). Isuna qurxiya Bandhigga Weyn".
*Al-Xaaqqah (13-24).*

25. Ruuxiise kitaabkiisa laga siiyo bidixda, wuxuu odhanayaa, "Magacay ba', ee maan la i siinnin kitaabkayga".
26. "Xisaabtaydana maanan ogaanin".
27. "Magacay ba', ee maxaan u soo noolaaday".
28. "Xoolahaygii wax iima tarin".
29. "Waxaa lumay awooddaydii (iyo xujadaydii)".
30. Waxaa loo odhan, "Qabta oo gacmihiisa iyo luquntiisa isku xidha".
31. "Naarta Jahannamana geliya".
32. "Markaas geliya silsilad toddobaatan dhudhun ah".
33. "Maxaa yeelay wuxuu ahaa kaan rumaynin Eebbaha Weyn".
34. "(Ee) aan fari jirin in masaakiinta wax la siiyo".
35. "Maanta (Qiyaamaha) kuma leh saaxiib".
36. "Cuntona kuma leh aan ahayn dheecaanka (ehlu naarka)".
37. "Cuntodaasna ma cuno kuwa gefay waxaan ahayni (gaalada)".
38. Waxaan ku dhaaran waxaad aragtaan (makhluuqaad ah).
39. Iyo waxaydaan arkayninba.
40. ee Quraanku waa hadalkii Eebbe uu u soo dhiibay rasuul sharaf leh.
41. Hadal gabayaana ma aha. Wax yar ayaadse rumaynaysaan (Xaqa).
42. Hadal wax sheegana ma aha. Wax yar ayaadse waantoobaysaan.
43. (Qur'aanku) wuxuu ka soo degay Eebbaha Caalamka.

Xaq-diideyaasha waxaa lagu abaal marin maalinta Qiyaame xumaantay kasbadeen, waxaana laga siin kitaabkooda xagga bidix. Markaasay calaacali. Waxaana la gelin naar daran oo cunto iyo cabbid xun mooyee aan wax kale lahayn.
Qur'aankuna waa hadalkii Eebbe, rasuul sharaf leh ayuuna Eebbe ku soo dejiyey. Xumaanta iyo ceebaha ay gaaladu ku sheegeenna waa ka fog yahay (Quraanku), waana digniin iyo raxmadda

Caalamka.
*Al-Xaaqqah (25-43).*

44. Hadduu nagu been abuurto (nebi Maxammed).
45. Waxaannu ku qaban gacan adag.
46. Waxaannu goynaynaa xididka wadnaha.
47. Ruux idin ka mid ah oo naga celinna ma jiro.
48. Qur'aankuna waa waanada kuwa Eebbe ka dhawrsada.
49. Waxaan og nahay inay idinka mid yihiin kuwo beenin (Qur'aanka).
50. Qur'aanku waa qoomamada gaalada (Maalinta Qiyaame).
51. Qur'aanku waa run dhab ah.
52. Ee nebiyow u tasbiixso magaca Eebbe ee Weyn.

Qur'aanku waa hadalkii Eebbe uu ku soo dejiyey nebiga Maxammed ah (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa Eebbe ha yeelee), malaku Jibriilna soo gaarsiiyey; mana siyaadin karo.
Qur'aankuna waa waanada Muu'miniinta iyo kuwa xumaanta ka dhawrsada, waana xujo iyo qoomamada gaalada, waana xaq sugan.
Ibnu Cabbaas wuxuu yidhi: " 'Watiinku' waa taxanaha qalbiga, waana xididkuu ku xidhan yahay".
*Al-Xaaqqah (44-52).*

068: **Suurat Al-Qalam**
Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.
1. Eebbe wuxuu ku dhaartay qalinka iyo waxa malaa'iigtu qorayso (camalka dadka).
2. Ee nebiyow nicmada Eebbe darteed lama waalnid.
3. Waxaana kuu sugnaaday ajri aan go'ayn.
4. Waxaana kuu sugnaatay dabeecad (fiican) oo weyn.
5. Waad arki doontaa nebiyow. Gaaladuna way arki doonaan.
6. Kiinna waalan (ama la caddibo).
7. Eebbe waa og yahay cidda ka dhunta (lunta) jidkiisa. Waana og yahay cidda hanuunsan.
8. Ee nebiyow ha maqlin xaq-beeniyeyaasha (warkooda).
9. Waxay jecel yihiin in aad u iilato, iyana kuu soo iishaan.
10. Ha maqlin dhaar badane dhammaantiis oo dullaysan.
11. Oo xanlow ah, isku-diraa (diredirable) ah.
12. Khayrka iyo xoolahana reebta, gardarrow (xad-gudbe) iyo dembiile ah.
13. Xumaantana ku madax adag, isku dhejisna (is-ku-dhejiye) ah (xumaanlow ah).
14. Inuu xoolo iyo wiilal leeyahay darteed (ayuu sidaas u falay).
15. Marka Quraankayaga lagu akhriyana wuxuu dhahaa, "Waa dadkii hore warkoodii".
16. Wuxuuse Eebbe ka calaamayn sanqaroorka.

Eebbe wuxuu nebiga ugu nicmeeyey ajri weligii socda iyo akhlaaq wanaagsan.
Dadkuna iskuma qasna Eebbe agtiisa, cid walba, mid toosan iyo mid dhunsan (lunsan). Weligaana ha maqlin warka ruuxa xanlowga ah, beenlowga (beenaale) ah ee isku diraaga ah, xumaan jecaylka ah.
Nebigana (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) waxay ahayd dabeecaddiisu Quraanka, siday Caai'sha sheegtay, wuxuuna yidhi, "Jannada ma galo namiimiye".
*Al-Qalam (1-16).*

17. Eebbe wuu imtixaanay gaaladii (reer Maka), sidii loo imtixaanay 'kuwii beerta' markay ku dhaarteen inay aroortii goostaan.
18. Iyaga oo aan odhan, "Haddii Eebbe idmo".
19. Waxaase beertii xagga Eebbe uga yimid amar, iyagoo hurda.
20. Waxayna noqotay wax la shafay (jafay) oo kale.

21. Wayna isu dhawaaqeen subaxdii.
22. Iyagoo leh, "Kallaha oo beerta goosta".
23. Wayna tageen iyagoo codka hoos u dhigi.
24. "Inaan beerta maanta miskiin soo gelin".
25. Wayna kallaheen iyagoo diiddan (in miskiin u soo galo).
26. Markii ay arkeen beertii sida ay tahay, ayey isku yidhaahdeen, "Waan soo dhunnay".
27. Haddana way is garteen, waxayna yidhaahdeen, "Ma ahee, waa la inna hoojiyey".
28. Markaasaa kii u fiicnaa yidhi, "Miyaanan idin ku odhan, waar Eebbe weyneeya".
29. Markaasay yidhaahdeen, "Eebbaa weyn, waannu xad gudubnay".
30. Markaasaa qaarba qaar ku jeedsaday (jeesteen) iyagoo is dagaali (canaanan).
31. Waxayna dheheen, "Magaceen ba'ye, waan xad-gudubnay".
32. "Eebbe wuxuu u dhow yahay inuu innoogu beddelo mid ka fiican, isagaan khayr ka rajaynaynaa eh".
33. Caddibaaddu waa sidaas. Caddibaadda Aakhiro ayaase ka weyn haddii ay wax og yihiin.

Adduunku waa imtixaan. Waase in ruuxu ka faa'iidaysto imtixaanka oo isa saxo hadduu qalloocsan yahay sidaa reer Maka ahaayeen iyo wixii la mid ah.
Qisadani waa qiso weyn oo xikmad iyo waano ku jirto.
Sidaas daraadeed, waa inaan ruuxna isla weynaanin, wanaag in aanu samaynna ku dhaaranin oo masaakiinta iyo dadka tamarta daranna goynin. Haddii kale, ha sugo caddibaadda Adduunka iyo mid Aakhiroba.
Dembiguba risqiga ayuu dadka hoojiyaa, siduu nebigu yidhi (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee).
*Al-Qalam (17-33).*

34. Kuwa Eebbe ka dhowrsadaa waxay Eebbe agtiisa ku leeyihiin jannada Naciima.
35. Ma Muslimiinta ayaannu kala mid dhigaynaa dembiileyaasha.
36. Sidee baad u odhan kartaan sidaas.
37. Mise gaalooy waxaa idiin sugnaaday kitaab aad akhrisataan.
38. Oo waxaad doontaanba aad ka helaysaan.
39. Mise ballan adag ayaad naga qaaddeen tan iyo maalinta Qiyaame oo waxaad rabtaan aad xukumaysaan.
40. Weydii (nebiyow) gaalada cidda dammiinka ugu ah xaalkaas.
41. Mise dad la wadaaga arrintaas ayey leeyihiin. Ha keeneen kuwaas hadday run sheegi.
42. Maalinta dhudhunka la faydi doono, gaaladana loogu yeedhi doono inay sujuudaan, ma karayaan sujuud.
43. Indhaha gaaladu Maalintaas waa dullaysan yihiin, waxaana ka muuqda walbahaar iyo qoomammo. Waxayna ahaayeen (Adduunka) kuwa loogu yeedhay sujuud iyagoo nabad qaba.

Eebbe cid walba wuu abaal mariyaa; Muslim iyo gaal. Wanaag fale iyo xumaan falena isku mid kama dhigo. Gaalana wax xujo ah uma haysato xumaantooda.
Maalinta Qiyaamana dadka xun Eebbe wuu imtixaami, wuxuuna fari inay sujuudaan. Hase yeeshee, ma karayaan, maxaa yeelay Adduunkii ayaanay sujuudi jirin iyagoo nabad qaba. Dulli iyo qoomammo ayaana (gaalada) ka muuqan Maalintaas.
*Al-Qalam (34-43).*

44. Isu kaaya daa Aniga iyo kuwa beeniyey Quraanka, waana sasabi iyagoon ogeyn.
45. Waana sugi tan iyo muddo. Maamulka Eebbana waa xoog badan yahay.
46. Nebiyow ma waxaad weydiisatay gaalada ujuuro oo markaas cusleeyey.
47. Mise waxa maqan ayaa agtooda yaal oo ay wax ka qori.

48. Ku samir xukunka Eebbe. Hana noqonin sidii saaxiibkii Xuudka (mallayga/kalluunka - nebi Yoonis) markuu naadiyey Eebbihiis isaga oo walbahaarsan.
49. Haddaan naxariista Eebbe haleelin waxaa lagu tuuri lahaa cidla' (bannaan), isagoo la dagaalay.
50. Waxaase doortay Eebbihiis, wuxuuna ka dhigay kuwa wanaagsan.
51. Waxay u dhow yihiin kuwii gaaloobay inay daymada kugu legdaan markay maqlaan Qur'aanka. Waxayna odhan, "Waa waalan yahay (nebigu)" .
52. Quraanka iyo nebiguna waa uun waanada Caalamka.

Amarka Eebbaa iska leh, ruux walbana siduu doono ayuu ku maamulaa.
Quraankana Eebbe isagaa soo dejiyey, nebiguna ujuuro ka (ga) ma rabin cidna. Wuxuuna, had iyo jeer, Eebbe fari jiray (nebiga) xaq sheegid iyo adkaysi iyo dulqaad.
Qur'aankuna waa raxmaddii Eebbe u soo dhiibay nebiga. Mana habboona in cidda akhriyi (Quraanka) la guulguulo oo xumaan lagu tilmaamo, maxaa yeelay, waa waanada Adduunka dhammaan.
Nebiguna (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi, "Eebbe wuu u sugi (u yara kaadin) daallimka. Markuu qabtana ma fakiyo (badbaadiyo).
*Al-Qalam (44-52).*

067: **Suurat Al-Mulk**
Magaca Eebbe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo Naxariis gaar ahba naxariista.
1. Waxaa barako badnaaday (oo weynaaday) Eebbaha xukunku awooddiisa ku jiro ee wax walbana kara.
2. Eebbaha abuuray geeri iyo nololba, si uu dadoow idiin imtixaamo kiinna camal fiican. Eebbana waa Adkaade, Dembi-dhaafe ah.
3. Eebbe waa Midka abuuray toddobo samo oo isdulsaaran. Kuna arki maysid abuurka Eebbaha Raxmaanka ah kala tagsani. Bal daymada celi inaad argatid wax dillaac ah.
4. Haddana celi daymada. Waxaa kugu soo noqon aragga oo dhibban, daallanna.
5. Eebbe wuxuu ku qurxiyey samada dhow nalal (xiddigaha). Wuxuuna ka dhigay xiddigahaas kuwo lagu gano shayaadiinta. Wuxuuna Eebbe u diyaariyay kuwaas (shaydaamada) naarta Saciiro.

Eebbe khayrkiisu waa badan yahay, wax walbana awooddiisa ayey ku hoos jiraan. Wuxuu doonana wuu karaa.
Dadkana waxaa loo abuuray in la imtixaano kooda camal Aakhiro iyo kan Aduunkaba wanaajiya.
Eebbe abuuriddiisa uu cirka abuurayna wax dhaliil ah loo heli maayo sida khalqigiisa kaleba (aan iin/dhaliil loogu helaynin).
Xiddigahana Eebbaa abuuray iyagoo nalal u ah cirka, shayaadiintana lagu eryo.
Eebbaha awooddaas leh waa in la caabudo, jidka uu farayna lagu socdaa.
Rasuulkuna (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: "Eebbe wuxuu ku dulleeyey Banii Aadamka geeri. Wuxuuna ka yeelay Adduunka guri nolol iyo geeri. Aakhirona wuxuu ka yeelay guri abaalmarin iyo waarid". Waxaa weriyey Ibnu Abii Xaatim.
*Al-Mulk (1-5).*

6. Kuwa ka gaaloobay Eebbahood waxaa u sugnaaday caddibaadda Jahannamo, meel loo ahaadana iyadaa u xun.
7. Marka gaalada lagu tuuro naarta, waxay ka maqli cod xun oo daran, iyadoo karaysa.
8. Waxay u dhow dahay inay cadho daraadeed (naartu) la kala dillaacdo. Marka koox (gaalo ah) lagu ridaba, waxaa warsada malaa'iigta naarta ka shaqeysa iyagoo ku dhihi, "Miyaanu idiin iman wax idiin digaa".
9. Waxayna ugu jawaabi, "Waa noo yimid wax noo digaa. Waanse beeninnay, annagoo leh, 'Ma soo dejinin Eebbe waxba. Idinkuna waxaad ku sugan tihiin baadi weyn'."

10. Gaaladii waxay dhaheen, "Haddaan wax maqlaynno ama aan wax kasaynno naarta Saciiro ehelkeeda maannu noqonneen".
11. Waxay qirteen (gaaladu) dembigoodii. Waxaana u sugnaatay fogaansho naarta Saciiro ehelkeeda.

Xaq-diideyaashu waxay geli naar daran oo karaysay, qaylana leh. Malaa'iigta naartuna si canaan iyo guulguul ah ayey u warsataa in rasuul u diga loo soo diray iyo in kale. Iyaguna (gaaladu) way qirtaan in rasuul loo soo diray, ayse beeniyeen, xaqiina diideen.
Wayna calaacaleen (gaaladu) iyagoo leh, "Haddaan wax kasayno naar maannu galleen".
Sidaas daraadeed, waa in Eebbe laga yaabo, laguna waano qaato arrintaas (calaacalka gaalada iwm).
Waxaa sugnaaday, "Dadka lama halaago intay naftoodu ka garaabaan".
*Al-Mulk (6-11).*

12. Kuwase Eebbe ka yaaba iyagoon la arkaynin (Eebbe mooyee) waxaa u sugnaaday dembi-dhaaf iyo ajri weyn.
13. Ama hadalka hoos u dhiga dadoow ama kor u qaada. Eebbe waa og yahay waxa laabta ku jira.
14. Ma waxaan wax ogeyn Eebbaha wax walba abuuray ee wax walba daalacan.
15. Eebbe waa kan dhulka ka dhigay mid laylyan ee ku socda waddooyinkiisa, kana cuna quudkiisa. Eebbaana dadka loo soo kulmin (Qiyaamaha).
16. Miyaad ka aammin noqoteen Eebbaha Sare inuu dhulka idin la gooyo, uuna idinla dhaqdhaqaaqo dhulku.
17. Miyaadse ka aammin noqoteen Eebbaha Sare inuu dhagaxyo naar ah idin ku soo daadiyo. Waad ogaan doontaan digniinta Eebbe cidhibteeda.
18. Waxaa Eebbe beeniyey gaaladii (kuwa reer Makaad) ka horreeyey, sidayse ahayd ciqaabtii Eebbe.

Dadka Eebbe si dhab ah u rumeeyey way caabudi (Ilaahay), kana dhowrsan xumaanta iyagoon arkaynin (Eebbe) ama dad ha la joogeen ama keli ha ahaadeene. Eebbana wuxuu ku abaal marin dembi-dhaafkiisa.
Eebbaha wax walba og ee dhulka laylyey ee Qiyaamaha loo soo kulmi, miyaa ciqaabtiisa cidina ka aammin noqon kartaa.
Dadka xun iyo gaaladaba waxaa u caado ah inay Eebbe beeniyaan, waxaase ku dhici ciqaabta Eebbe. Waxaana ka nabad geli (ciqaabta Eebbe) ruuxii waddada Eebbe qaada (raaca).
Toddobada Eebbe hadheeyo maalinta Qiyaame waxaa ka mid ah 'kuwa Eebbe ka yaaba' iyo 'kuwa xusuusta iyagoo keli ah, indhohooduna ilmeeyaan', waa Saxiix.
*Al-Mulk (12-18).*

19. Miyeyna dadku arkaynin shimbirka korkooda ah ee marna baalka (baalasha) fidin, marna laabi. Wax haya oo aan Eebbaha Raxmaan ah mooyee aanu jirin. Eebbena wax walba wuu arkaa.
20. Waa kuma (cidda) Gargaaraha Eebbaha Raxmaan ah ka soo hadhay ee u gaargaari gaalada. Gaaladu waxay ku sugan yihiin kadsoomid.
21. Waa kuma kan wax quudiya haddii Eebbe haysto risiqiisa (arsaaqadda). Gaaladu waxay ku madax adaygeen isla-weyni iyo xaq-diidnimo.
22. Midkee wanaagsan; ruux wejiga ku socda iyo mid si toosan oo siman waddo toosan ugu socda.
23. Dheh nebiyow, "Eebbe waa midka dadoow idin ahaysiiyey. Maqal iyo arag iyo caqlina idiin yeelay. Wax yar baadse Eebbe ku shukridaan".
24. Dheh, "Eebbe waa midka dadkoow dhulka idin ku beeray. Isagaana (Qiyaamaha) loo soo kulmin doonaa dadka".

Eebbe awooddiisa ayaa wax walba ka sarreysa. Gargaare, Quudiye, Abuure iyo Wax-Walba-Ogaadena waa Eebbe.
Maalinta Qiyaamana (Eebbe) waa la hor iman. Ruux walbana wuxuu (Eebbe) ku abaal marin camalkiisa.
Nebiguna (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) markii la warsaday (weydiiyey), "Sidee dadka loogu soo kulmin wejigooda?"
Wuxuu yidhi, "Eebbaha ku socodsiiyey (dadka) lugohooda, wuxuu karaa inuu ku socodsiiyo wejigooda".
*Al-Mulk (19-24).*

25. Waxay dhihi gaaladu, "Waa goorma waqtiguu dhici waxa naloogu gooddin, haddaad run sheegaysaan".
26. Dheh, "Eebbaa og goortaas. Waxaanse ahay anigu u dige cad (muuqda)".
27. Markayse gaaladu naarta oo u dhow arkaan, waxaa xumaan oo doorsoomi wejiga gaalada. Waxaana lagu odhan, "Waa taa caddibaaddii aad doonayseen (dedejisanayseen)".
28. Dheh, "Balse ka warrama haddii Eebbe aniga (nebiga) iyo inta ila jirta uu halligo (halaago) ama u naxariisto. Yaa gaalo ka korin caddibaad daran".
29. Dheh, "Eebbe waa Raxmaan, waana rumaynay, waana talo saarannay. Waadse ogaan doontaan (gaalooy) cidda baadi cad ku sugan".
30. Dheh, "Balse (ka) warrama, hadday biyuhu dhulka ku gudhaan. Yaa idin siin biyo durduri (ma jiro Eebbe waxaan ahayn)".

Dadka xumi, had iyo jeer, aad uma fekeraan. Sidaas daraadeed, waxay ku hadlaan gefaf iyo xujooyin qiimo daran.
Nebiguna (naxariis iyo nabadgelyo Eebbe korkiisa ha yeelee) shaqadiisu waa inuu dadka wanaag ugu yeedho, xumaantana uga digo.
Wax walbase Eebbaa kara oo og. Markase uu gaalada haleelo caddibaad daran ayey (u) ogaan doonaan dhabta iyo xaqiiqada. Gargaarka kuwa xaqa rumeeyey iyo imtixaankoodaba Eebbaa leh, gaalona caddibaad kama baajinayso.
Waa in Eebbaha Raxmaan ee awoodda leh ee dadka quudiya isaga uun la caabudaa, lagana yaabaa.
*Al-Mulk (25-30).*

--- *** ---

Aakhiro iyo Adduunkaba, Ilaahay ha ka abaal-mariyo dhammaan dadkii hawshan gacan ka geystay, waalidiintoodii iyo ciddii ka faa'iideysataba. Aammiin.

*Insha Allaah, jisas kalena waan soo diyaarin doonaa - ilaa soddonka jus oo idil - ee Ilaahay waqti iyo kheyraad ha ii sii kordhiyo*. Aammiin.

Wixii talo, tusaale ama fikrad ah ee mashruucan ku saabsan, fadlan, u soo dir: eng-s-jama@hotmail.com.

*Fadlan, sii gudbi si dadka afka Soomaaliga ku hadla oo idili uga faa'iideystaan!*

Mahadsanid.